Seattle Office of Economic Development

# Hagaha codsiga barnaamijka Ku-Noqoshada Ganacsiga

U diyaargarow inaad ku buuxiso codsiga hal fadhi. Ma kaydin kartid xogtaada oo ma soo celin kartid hadhow. **Codsiyada waxay furan yihiin ilaa Diseembar 2025, ama ilaa inta lacagtu ka dhamaanayso**.

*Hagahan wuxu kaa caawinaya diyaarinta codsigaaga iyo dukumentiyada loo baahan yahay* . **Codsiga waa inaad ku buuxisaa khadka isagoo Ingiriisi ah.** Waxaan haynaa shaqaale laba luuqadood ku hadla oo diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalaha oo ay kaa caawiyaan buuxinta codsigaaga. Si aad u hesho adeegyada turjumaada ama fasiridda, waxaad wici kartaa (206) 684-8090. Fadlan dhaaf fariin cod ah oo raaci magacaaga, lambarka taleefanka, luuqadda aad doorbidayso, iyo nooca taageerada loo baahan yahay.

Wixii su'aalo dheeraad ah, caawinta naafada, ama macluumaadka caawimaadda, fadlan kala xidhiidh Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha 206-684-8090 ama oed@seattle.gov .

*Macluumaadka codsiga ee loo gudbiyo Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha Seattle waxaa laga yaabaa inay noqdaan xog dadweyne. Xubnaha dadwaynahu waxay ku codsan karaan macluumaadka codsi rasmi ah.*
*Macluumaadka waxa ay ku xiran yihiin siidaynta dadweynaha sababtoo ah Xeerka Shaacinta Dadweynaha ee Gobolka Washington (PDA:RCW 42.17). Si aad u codsato koobiga sharciga, kala xidhiidh Xafiiska Dib-u-habaynta Xeerka Gobolka Washington ee Olympia (360) 786 6777.*

## U qalmitaanka ganacsiga

Si aad ugu qalanto, ganacsigaagu waa inuu buuxiyaa shuruudaha ugu yar:

- Waa inaad leedahay Shatiga Ganacsiga ee Magaalada Seattle oo aan dhacsanayn.
- Iyadoo la raacayo dhammaan sharciyada federaalka, gobolka, iyo magaalada
- Hadda furan ahna ganacsi shaqaynaya.
- Ku yaal gudaha Xadka magaalada Seattle.
- Shaqeynayay ugu yaraan 12 bilood ka hor taariikhda soo gudbinta codsiga.
- Aan lahayn wax ka badan saddex (3) goobood.
- Noqo ganacsi madax-bannaan oo aan silsilad ahayn.
    - **Ganacsiyada si madaxbanaan loo leeyahay** ee laamaha leh waxay codsan karaan oo kaliya deeqaha Sanduuqa Dayactirka Dukaamada Hortooda.
- Ahow ganacsi faa'iido doon ah ama hay'ad aan faa'iido doon ahayn, 501(c)(3), 501(c)(6), ama 501(c)(9)
- Lahayn wax ka badan 50 shaqaale waqti-buuxa u dhigma.
- Sameeya in ka badan $1,000 oo aan ka badnayn $7 milyan dakhliga saafiga ah ee sanadlaha ah sida lagu sheegay cashuuraha Ganacsiga iyo Shaqada ee Waaxda Maaliyadda iyo Adeegyada Maamulka ee Magaalada Seattle 2024.
- Waa in uu ku shaqeeyaa goob dhismeed iyo/ama baabuurta guurguura **ee u adeega dadweynaha.**

## Shuruudaha lacag-celinta

Barnaamijka Ku-Noqoshada Ganacsiga wuxuu ku shaqeeyaa qaabka lacag-celinta, taas oo macnaheedu yahay codsaduhu waa inuu horay u iibsaday qalab iyo/ama bixiyay kharashka dayactirka si ay u helaan deeq. Waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbiso qaansheeg(yo) la bixiyay ama rasiidh iibsasho iyo/ama dayactir dhammaystiran.
**Qiyaasaha iyo/ama qiimeynta lama aqbali doono** .

Qadarka deeqda ayaa noqon doona cadadka saxda ah ee aad u raadinayso qarash-celin ahaan:

- **Sanduuqa Dayactirka Dukaamada Hortooda:** lacagta dib u celinta ugu badan waa $3,000.
- **Sanduuqa Ammaanka Dukaamada Hortooda:** lacagta dib u celinta ugu badan waa $6,000.

## Codsigan wuxuu kuu ogolaanayaa inaad codsato waxyaabaha soo socda:

### Deeqda Dayactirka Dukaanka hortiisa

Sanduuqa Dayactirka Dukaamada Hortooda waxa uu bixiyaa kharashka dayactirka dukaanka hortiisa ee kharribka ama burburka hantida kale ee dhacay ama ka dib Luulyo 1, 2024. Lacag-celinta waxay dabooli doonta Kharashka ilaa $3,000 shilkiiba. Waxa aad heli kartaa ilaa **saddex deeq sanad kasta dhacdo kasta oo ugu badnaan ah $3,000 deeq kasta.**

Dhacdo kasta oo u qalanta, waa inaad diyaarisaa macluumaadka soo socda ka hor intaadan codsan:

- Caddaynta lacag-bixinta (koobiga rasiidka iyo/ama qaansheegta la bixiyay) ee dayactirka la dhamaystiray.
- Lambarka dhacdada ee Waaxda Booliska Seattle. *Haddii aadan mid haysan, fadlan ku gudbi warbixin khadka si aad u hesho lambarka dhacdada: Warbixinta Dembiyada Khadka – Booliska | Seattle.gov.*

Burburka hantida ee dukaanka hortiisa ee u qalanta waxaa ka mid ah, laakiin aan ku koobnayn:

- Albaabada
- Qufulada
- Dayrarka
- Ganjeellada
- Calaamadaha
- Daaqadaha jaban ama xardhan

### Sanduuqa Ammaanka ee Dukaamada Hortooda

Sanduuqa Ammaanka Dukaamada Hortooda waxa uu bixiyaa lacag celin hal mar ah oo loogu talagalay hagaajinta amniga ee ka hortagaysa kharribadda iyo burburka hantida. Waxa laga yaabaa inaad hesho **lacag celin hal mar ah oo gaadhaysa $6,000 ganacsigiiba**. Caddaynta kharribaad ama khasaare **looma**baahna si aad u codsato Sanduuqa Ammaanka ee Dukaamada.

Si aad ugu qalanto, waa inaad haysaa macluumaadka soo socda oo diyaar ah ka hor intaadan codsan:

- Kahortagga Dambiyada oo dhameystiran oo loo marayo qiimeynta amniga Naqshadeynta Deegaanka (CPTED). Tan waxaa lala buuxin karaa iskuduwaha ka hortagga dembiyada ee Waaxda Booliska Seattle.
- Caddaynta lacag-bixinta, sida nuqulka rasiidka iyo/ama qaansheegta la bixiyay, ee hagaajinta amniga.

Seattle Office of Economic Development

## Waa maxay Qiimaynta Ammaanka CPTED?

Qiimaynta Ammaanka CPTED ee ganacsiyada waxay ku salaysan yihiin Kahortagga Dembiyada Iyadoo loo marayo Naqshad Deegaanka (CPTED) iyo xeelado kale oo la xaqiijiyay oo ka hortagga dembiyada. Waxa ay bixisaa fursad lagaga wadahadlo welwelka amniga iyo in la aqoonsado qorshayaasha iyo agabka si gacan looga geysto kor u qaadida nabadgelyada iyo amniga iyo yareynta khatarta dembiyada. Kaliya tillaabooyinka ammaanka la iibsaday kadib qiimeynta amniga CPTED ayaa u qalma lacag celin.

Si aad u ballansato qiimaynta amniga ee CPTED, fadlan iimayl u dir Isuduwaha Ka Hortagga Dembiyada ee ku yaal saldhigga aagaagga.

- Ka hel saldhigga aagaagga halkan.
- Halkan ku go'aami Isku-duwaha xaafaddaada ee Ka Hortagga Dembiyada.
- Iimaylkaaga, fadlan hubi inaad ku darto macluumaadka soo socda:
  - Magaca ganacsigaaga
  - Cinwaanka ganacsigaaga
  - Ogsoonow inaad codsanayso qiimaynta amniga CPTED ee Sanduuqa Ammaanka Dukaamada Hortooda.

## Kharashyada u qalma waxaa ka mid noqon kara, laakiin kuma koobna:

- Iftiimin
- Filimka amniga daaqadda
- Dhireynta daaqadaha
- Daaqadda "Aan dillaacin" ee muraayadaha dahaaran
- Meheradda iyo calamadaha hagidda (fur, xidh, geli, bixitaan, saacadaha shaqada)
- calaamadaynta ciwaanka
- Dhisidda difaac ee meelaha laga galo, sida ubaxyada ama geedaha gaagaaban
- Dhireynta waddooyinka ee la oggol yahay (Fiiri hab-raaca alaabta waddooyinka)
- Albaabka maqaska
- Albaabka amniga ee laablaaban ee daaqada
- Qataarada waaweyn
- Qufullada Daaqadaha
- Nidaamka qaylo-dhaanta qandaraas la'aanta ah ama xirmada amniga
- Looxyada lagu xirayo daaqadaha ama albaabada ee ku meel-gaarka ah
- Dayactirka ama beddelka daaqada
- Dayactirka albaabka ama beddelka
- Dayactirka Ganjeelada ama beddelka

Seattle Office of Economic Development

## Shuruudaha Degmada Taariikhiga ah

Haddii meheraddaadu ku taal Degmo Taariikhi ah, waxa kale oo laga yaabaa inaad u baahato inaad hesho Shahaadada Oggolaanshaha ka hor intaadan iibsan maalgashiga la xidhiidha CPTED. Halkaan ka hubi haddii meheraddaadu ku taal Degmo Taariikhi ah.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan shuruudaha ganacsiyada degmada taariikhiga ah, wac Kooxda Ilaalinta xaafadaha Taariikhiga ah ee Waaxda Xaafadaha Seattle (206) 684-0228.

## Kharashyada aan u qalmin Barnaamijka Ku-noqoshada Ganacsiga

Lacagahan ma daboolayaan iibsashada kamaradaha amniga, magdhawga shaqaalaha amniga, ama khasaaraha alaabta la xado.

Lacagahan ma daboolaan qoraallada riinjiga. Haddii loo baahdo ka saarista qoraallada, waxaad:

- Buuxin kartaa foomka Ogolaanshaha iyo Idan-siinta Magaalada ee ka saarista qoraallada bilaashka ah: Ogolaanshaha Nadiifinta Garaafada iyo Foomka Idan-siinta (seattle.gov).
- Isticmaal Aabka Hel / Hagaaji.
- Ka wac Khadka Warbixinta Garaafada ee Magaalada (206) 684-7587.

## Habka dib u eegista codsiga

Marka codsiga la gudbiyo, waxay mari doontaa marxalado badan oo dib u eegis ah. Imayl toos ah ayaa la soo diri doonaa marxalad kasta oo dib u eegista ah si laguugu ogeysiiyo xaaladda codsigaaga. Waxaad heli doontaa iimayl haddii macluumaad uu maqan yahay ama aanu dhammaystirnayn.

Waxaad heli doontaa iimayl xaqiijin ah marka codsigaaga la helo. Iimayl ka-reebis ah ayaa la soo diri karaa marxalad kasta haddii aadan buuxin shuruudaha, ama aadan ka jawaabin muddo dheer.

## Macluumaadka xiriirka barnaamijka Ku-noqoshada Ganacsiga

Wixii su'aalo dheeraad ah, tarjumaad ama turjubaano, caawiinta naafada ama macluumaadka caawinta, iyo taageero farsamo, fadlan iimayl u dir OED_BacktoBusiness@seattle.gov.

Seattle Office of Economic Development

# Su'aalaha codsiga

Fadlan dib u eeg su'aalaha codsiga ee hoose ka hor inta aadan bilaabin qaybta 1 ee codsiga.

*Hagahan wuxuu kaa caawinaya diyaarinta codsigaaga iyo dukumentiyada loo baahan yahay. Codsiga waa inaad ku buuxisaa khadka isagoo Ingiriisi ah.* Waxaan haynaa shaqaale laba luuqadood ku hadla oo diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalaha oo ay kaa caawiyaan buuxinta codsigaaga. **Si aad u hesho adeegyada turjumaada ama fasiridda, waxaad wici kartaa (206) 684-8090.** Fadlan dhaaf fariin cod ah oo raaci magacaaga, lambarka taleefanka, luuqadda aad doorbidayso, iyo nooca taageerada loo baahan yahay.

*Macluumaadka codsiga ee loo gudbiyo Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha Seattle waxaa laga yaabaa inay noqdaan xog dadweyne. Xubnaha dadwaynahu waxay ku codsan karaan macluumaadka codsi rasmi ah.*
*Macluumaadka waxa ay ku xiran yihiin siidaynta dadweynaha sababtoo ah Xeerka Shaacinta Dadweynaha ee Gobolka Washington (PDA:RCW 42.17). Si aad u codsato koobiga sharciga, kala xidhiidh Xafiiska Dib-u-habaynta Xeerka Gobolka Washington ee Olympia (360) 786 6777.*

---

## Qaybta 1: Macluumaadka xiriirka

*Fadlan hubi in macluumaadka hoos ku qoran yahay mid sax ah. Waxaan u isticmaali doonaa macluumaadkan si aan kula xiriirno adiga iyo ganacsigaaga wixii ku soo kordha codsigaaga deeqda.*

Ma adigaa iska leh?

- Haa
- Maya

Magaca koowaad

ee mulkiilaha:

Magaca dambe

mulkiilaha:

iimaylka:

Xaqiiji iimaylka:

Lambarka taleefanka:

Xaqiiji lambarka taleefanka

Magaca sharciga ah ee ganacsiga. *Fadlan ku qor magaca ganacsigaaga sida uu uga muuqdo shatiga ganacsiga ee Magaalada Seattle:*

Ganacsiga DBA (Ku shaqeeya magaca Ganacsiga). *Sidoo kale loo yaqaan Magacaaga Ganacsiga ee Diiwaangashan, kani badanaa waa magacaaga inta badan la aqoonsan yahay. Meheradaha qaar ayaa laga yaabaa inaysan lahayn DBA:*

Ciwaanka Dhismeed ee dukaankaaga. *Fadlan isticmaal kaliya 'goobta hadda' haddii aad buuxinayso codsiga goobtaada ganacsiga:*

a. Cinwaanka ( *Tus., 1234 Main St.)*
b. Cinwaanka 2
c. Magaalada
d. Gobolka
e. Zip Kodhka

Horay ma u codsatay Sanduuqa Dayactirka Dukaamada tan iyo markii dib loo furay Agoosto 2025? Tan kuma jiraan abaal-marinaha deeqda sanduuqa ugu horreysay ee Sebtembar 2022 ilaa Luulyo 2024.

- Haa
- Maya

Hadday haa tahay, waa maxay lambarka codsigaagii hore? (Ikhtiyaar ah). *Tan waxaa laga heli karaa iimaylka xaqiijinta ee codsigii u dambeeyay.*

Seattle Office of Economic Development

# Qaybta 2: Hubinta u-qalmitaanka

*Fadlan buuxi su'aalaha hoose si aad u xaqiijiso u-qalmitaanka.*

1. **Miyuu ganacsigaagu haystaa ruqsad ganacsi ee Magaalada Seattle oo ansax ah?** *Ganacsigaagu waa inuu haystaa ruqsada ganacsiga Seattle oo ansax ah si uu xaq ugu yeesho. Hubi Raadi qalab goob ganacsi si loo eego inaad haysato shati sax ah.*
    - Haa
    - Maya

2. **Ganacsigaagu ma shaqaynayey ugu yaraan 12 bilood?** *Kaliya ganacsiyada shaqaynayay ugu yaraan 12 bilood ayaa u qalma.*
    - Haa
    - Maya

3. **Ganacsigaagu ma ku yaalaa xadka magaalada Seattle?** *Kaliya meheradaha Seattle ayaa u qalma.*
    - Haa
    - Maya

4. **Meeqo meelood ayaa meheradaadu ku taal?** *Kaliya meheradaha leh saddex goobood ama ka yar ayaa xaq u leh.*
    - 1
    - 2
    - 3
    - In ka badan 3

5. **Ganacsigaagu mid shirkad weyn ka tirsan miyaa?** *Haddii aad doorato "Haa" oo aad buuxiso shuruudaha kale, waxaad* ***kaliya*** *codsan kartaa Sanduuqa Dayactirka Dukaamada Hortooda.* ***Ma codsan****kartid Sanduuqa Ammaanka ee Dukaamada.*
    - Haa
    - Maya

6. **Ganacsigaagu ma leeyahay wax ka yar 51 shaqaale waqti-buuxa ah (FTEs)?** *Isticmaal xisaabiyaha FTE si aad u hubiso. Ganacsiyada leh 50 FTE ama ka yar ayaa u qalma.*
    - Haa
    - Maya

7. **Ganacsigaygu wuxuu sameeyaa in ka badan $1,000 mana dhaafo $7,000,000 dakhliga saafiga ah ee sanadlaha ah sida lagu sheegay cashuuraha Ganacsiga iyo Shaqada (B&O) ee Waaxda Maaliyadda iyo Adeegyada Maamulka ee Magaalada Seattle 2024.** *Kaliya ganacsiyo leh $1,000 ilaa $7 milyan ee dakhliga saafiga ah ee sanadlaha ah ayaa xaq u leh.*
    - Haa
    - Maya

8. **Ganacsigaagu ma ku shaqeeyaa goob dhismeed?** *Dukaamada u qalma, oo ay ku jiraan baabuurta cuntada, waa inay si diyaar ah ugu furnaadaan dadweynaha si ay ugu qalmaan deeqdan.*
    - Haa
    - Maya

9. **Meheraddaadu ma baabuur cunto oo guurguura baa?**
    - Haa
    - Maya

10. **Ganacsigaagu ma yahay guri kiro ah oo wakhti gaaban ama mid dheer ah ama hanti maalgashi?** *Kirooyinka muddada gaaban waxaa ka mid ah Airbnb, Vrbo, iwm. Ganacsiyada hantida kirada ama maalgashiga xaq uma laha.*
    - Haa
    - Maya

11. **Ganacsigaagu ma yahay tagsi, rideshare, ama adeeg geyn cunto (tusaale, Uber, Lyft, Yellow Cab, Door Dash)?** *Adeegga tagsiga, rideshare, iyo cunto geynta uma qalmaan.*
    - Haa
    - Maya

12. **Ganacsigaaga ma loo habeeyey sidii ganacsi "madadaalada dadka waaweyn" sida hoos timaada Xeerka Degmada Seattle 6.270?** *Waxaad wax badan oo ku saabsan xeerarkan waxaad ka akhriyi kartaa gudaha* **Xeerka Degmada Seattle 6.270**. *Ganacsiyada madadaalada ee dadka waaweyn uma qalmaan.*
    - Haa
    - Maya

# Qaybta 3: Doorashada barnaamijka

**Dooro barnaamij:** *Waxaad dooran kartaa in ka badan hal.*

- **Sanduuqa Dayactirka Dukaamada:** Wuxuu bixiyaa kharash-celinta dayactirka dukaamada hortooda ee ka dhasha qarribid ama burburka hantida kale ee dhacay ama ka dib Luulyo 1, 2024. Meheradaha xaqa u leh waxay heli karaan ilaa **saddex deeq sanad kasta dhacdo kasta oo leh ugu badnaan $3,000 deeq kasta**.
  - Immisa deeqood ee dayactirka dukaanka hortiisa ayaad jeclaan lahayd inaad ku codsato arjigaan? Ganacsiyadu waxay heli karaan ugu badnaan saddex deeq ee dayactirka.
    - Mid
    - Laba
    - Saddex

- **Sanduuqa Ammaanka Dukaamada:** Wuxuu bixiyaa kharash-celinta horumarinta amniga ee ka hortagaya qarribidda iyo burburka hantida. Ganacsiyada xaqa u leh waxay heli karaan **lacag celin hal mar ah oo dhan ilaa $6,000 ganacsigiiba** . *Waa inaad ka haysataa qiimayn ammaan oo dhammaystiran oo CPTED ah khabiir shahaado haysta, sida Isku-duwaha Ka-hortagga Dembiyada ee Waaxda Booliiska Seattle. Kaliya tillaabooyinka amniga la iibsaday kadib markii qiimeynta amniga CPTED la dhameeyo ayaa u qalma lacag celin.*
  - **Ma dhammaystirtay qiimaynta amniga ee CPTED?**
    - Haa
    - Maya

Seattle Office of Economic Development

# Su'aalaha codsiga Sanduuqa Dayactirka Dukaamada

## Dhacdada 1

*Waxaa jira su'aalo kala duwan oo ku saabsan dhacdo kasta oo aad jeclaan lahayd inaad codsato deeq. Waxaad codsan kartaa deeqo ilaa saddex dhacdo. Fadlan uga jawaab hal jumlo oo su'aal ah, dhacdadiiba.*

**1. Waa maxay ciwaanka dhismeed ee meheradda uu shiqaaqadu ka dhacay:**

- Cinwaanka ( *Tus., 1234 Main St.)*
- Cinwaanka 2
- Magaalada
- Gobolka
- Zip Kodhka

**2. Waa maxay taariikhda dhacdada aad u codsanayso maalgelinta?**

**3. Maxaa sida ugu wanaagsan u qeexaya waxyeelada loo geystay dukaankaaga?**

- Daaqad jaban
- Albaab jaban
- Quful jaban
- Deyr jabay
- Ganjeel Jaban
- Calaamad jaban
- Waxkale:

**4. (Ikhtiyaar ah) Fadlan soo geli sawirka burburka haddii aad haysato mid diyaar ah.**

## Dukumentiyada iyo macluumaadka taageerada

*Fadlan kaliya soo gudbi dukumeenti taageero ah iyo macluumaadka la xidhiidha taariikhda dhacdada aad u codsanayso maalgelinta. Su'aalo cusub ayaa u soo bixi doona dhacdo kasta oo aad codsanayso.*

**1. Waa imisa kharashka aad u doonayso lacag-celinta?**

**2. Fadlan soo geli koobiyada rasiidhkaaga iyo/ama qaansheegtaada dayactirka ee ka tarjumaysa wadarta kharashka aad u raadinayso lacag-celinta. Dhammaan sawirada aasaasiga ah iyo faylasha qoraalka waa la aqbalayaa, oo ay ku jiraan JPEGs, PNGs, PDFs,**

**DOCs, XLSs. Fadlan ha soo galin muuqaallo.**

3. **Fadlan halkan ku soo gudbi lambarada warbixinta dhacdadaada.** *Haddii aadan mid haysan, waxaad halkan ku soo gudbin kartaa warbixin raadraac khadka ah si aad uga hesho lambarka dhacdada halkan: Warbixinta [Dembiyada Khadka - Booliska | Seattle.gov](#)***:**

4. **Waxyaalaha soo socda ee u qalma/dayactirka midkee ayaad u soo iibsatay ganacsigaaga? (Calaamadi dhammaan kuwa khuseeya)**

- Albaabada
- Qufulada
- Dayrarka
- Ganjeellada
- Calaamadaha
- Looxyada lagu xirayo daaqadaha ama albaabada ee ku meel-gaarka ah
- Dayactirka ama beddelka daaqada
- Dayactirka albaabka ama beddelka
- Dayactirka Ganjeelada ama beddelka
- Dayactirka nalka dibadda ama beddelka
- Waxkale:

5. **Sidee buu burburka hantida dukaanka u saameeyay ganacsigaaga? (Calaamadi dhammaan kuwa khuseeya)**
   - **a.** Khasaaraha dhaqaaleed
   - **b.** Carqaladeynta shaqada (sida saacadaha shaqada oo yaraaday, beddelka habdhaqanka ganacsiga)
   - **c.** Khasaaraha badeecada
   - **d.** Saameeynta xun ee shaqaalaha (sida niyadda ama shaqo-ka-tagista)
   - **e.** Hoos u dhaca macaamiisha
   - **f.** Kharashyada amniga oo kordhay
   - **g.** Qarashka Caymiska oo kordhay
   - **h.** Ma khusayso
   - **i.** Waxkale:

6. **Sicirrada caymiska ganacsigaaga ma kordheen ilaa iyo taariikhda dhacdada?**
    a. Haa
        i. Hadday haa tahay, meeqa boqolkiiba?
    - Maya
    - Ma khuseyso

7. **Caymiska ganacsigaagu ma daboolaa kharribaadda?**
    a. Haa
    b. Maya

# Su'aalaha codsiga Sanduuqa Ammaanka Dukaamada Hortooda

1. **Ma dhammaystirtay qiimaynta amniga ee CPTED?**
    - Haa
    - Maya

2. **Fadlan bixi macluumaadka soo socda ee ku saabsan qiimaynta ammaanka CPTED:**
    - Taariikhda qiimeynta amniga ee CPTED:
    - Cinwaanka Ganacsiga ee dib u eegista CPTED lagu dhameeyay:
        - Cinwaanka ( *Tus., 1234 Main St.)*
        - Cinwaanka 2
        - Magaalada
        - Gobolka
        - Zip Kodhka
    - Yaa sameeyay dib u eegista CPTED?
        - Barb Biondo, Saldhigga Galbeedka
        - Joe Elenbaas, Saldhigga Bari
        - Jennifer Satterwhite, Saldhigga Koonfur-galbeed
        - Matthew Brown, Saldhigga Koonfur
        - Katelyn Yep, Saldhigga Waqooyiga
        - Waxkale:

3. **Waxyaalaha soo socda ee xaqa u leh/tallaabooyinka amniga ka hortagga ah ee aad u iibsatay iyo/ama aad ka hirgelisay ganacsigaaga? (Calaamadi dhammaan kuwa khuseeya)**
    - Nidaamyada digniinta
    - Albaabka maqaska
    - Albaabada dusha sare
    - Filimka amniga ee korka daaqadaha
    - Iftiinka amniga
    - Qufulada
    - Dhalada aan jabin
    - Waxkale:

Seattle Office of Economic Development

## Dukumentiyada iyo macluumaadka taageerada

1. **Waa imisa kharashka aad u doonayso lacag-celinta?**

2. **Fadlan soo geli nuqul ka mid ah rasiidhadaada iyo/ama qaansheegtaada aad bixisay taasoo ka tarjumaysa wadarta kharashka aad ku raadinayso lacag-celinta. Dhammaan sawirada aasaasiga ah iyo faylasha qoraalka waa la aqbalayaa, oo ay ku jiraan JPEGs, PNGs, PDFs, DOCs, XLSs. Fadlan ha soo galin muuqaallo.**

3. **Fadlan soo geli sawir(yada) rakibaadda tillaabooyinka amniga haddii aad haysato mid la heli karo. (Ikhtiyaari)**

Seattle Office of Economic Development

# Qaybta 4: Macluumaadka Ganacsiga

*Fadlan geli macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan milkiilayaasha ganacsiga aasaasiga ah iyo ganacsiga.*

1. **Miyaad tahay milkiilaha meherada codsanaysa deeqdan?** *Milkiilaha meheraddu waa inuu dalbadaa deeqda.*
   - Haa
   - Maya
2. **Waa maxay luqadda aad door bidayso?** *Fadlan ka dooro liiska hoos -hoosaadka.*
   - Ingiriis
   - Isbaanish
   - Kantoniis
   - Taiwanese
   - Taishanese
   - Mandarin
   - Fiyatnaamiis
   - Luqadda Faraha ee Ameerika
   - Amxaari
   - Carabi
   - Bhutanese
   - Burmiis/Karen
   - Kongoliis
   - Farsi
   - Jabaaniis
   - Kuuriyaan
   - Laotian
   - Khmer/Kaamboodiyaan
   - Oromo
   - Nepali
   - Pashto/Daari
   - Ruush
   - Soomaali
   - Tagaloog
   - Af Thai
   - Tigrinya
   - Yukreeniyaan
   - Waxkale:

3. **Waa maxay qoomiyaddaadu?** *Dooro mid ama ka badan qaybaha waaweyn ee hoose.*
    - Aasiyan
    - Madow / Afrikaan Mareykan ah
    - Hisbaanik ama Latino/a/x
    - Bariga Dhexe ama Waqooyiga Afrika
    - Dhaladka Maraykanka ama Dhaladka Alaska
    - Dhaladka Hawaiian ama Jasiiradaha Baasifiga
    - Caddaan
    - Mid kale
    - Waxaan Doorbidiyaa inaan sheegin

4. **Sideed ku tilmaami lahayd jinsigaaga?** *Fadlan ka xulo liiska.*
    - Lab
    - Dhedig
    - Labeebshe
    - Doorbida in aan sheegin
    - Mid kale

5. **Imisa milkiile ayaa meheraddu leedahay?**

6. **Magacyada milkiilayaasha meherada ee dheeraadka ah.** *Fadlan hoos ku qor milkiilayaasha meherada ee dheeraadka ah:*

Seattle Office of Economic Development

7. **Fadlan dooro qaybta ku habboon nooca ganacsigaaga:**
    - Dukaanka: Tafaariiqda
    - Adeegyada cuntada: makhaayadaha iyo kafateeriyada
    - Adeegyada cuntada: baararka ama maqaayadaha
    - Adeegyada cuntada: baabuurta cuntada lagu kariyo, iyo suuqyada cuntada
    - Adeegyada gaarka ah (quruxda, jimicsiga, daryeelka ilmaha, nadiifinta dharka, adeegyada shakhsi ahaaneed ama macaamilka, goobaha hawlaha gudaha ee manhajka ka baxsan/ madadaalada, luuqyada bowling-ka, jimicsiga, goobaha ciyaaraha, iwm.)
    - Daryeelka caafimaadka (xarumaha caafimaadka, rugaha caafimaadka, guryaha dadka lagu xanaaneeyo, daaweeyayaasha duugista, dhakhaatiirta ilkaha)
    - Adeegyada ganacsiga (sharci, xisaabinta, suuq -geynta, la -talinta ganacsiyada)
    - Adeegyada xirfadeed ama farsamada (shirkadaha dhismaha, shirkadaha injineernimada)
    - Warshadaha hal-abuurka leh (filim; nolosha cawayska; dhacdooyinka gaarka ah; sawir qaadis; xayaysiis, naqshad garaaf, abuurista nuxurka; moodada, dharka, iyo dunta; suugaanta, daabacaadda, saxafiyiinta, tafatirka nuqulka; bandhig faneedka iyo machadyada dhaqanka; iyo meelaha baashaalka habeenkii)
    - Adeegyada maamulka (adeegyada taageerada maamulka)
    - Beeraha ama khayraadka dabiiciga ah (maamulka kaynta, beeralayda, macdanta, kalluumaysiga)
    - Xanaanada caruurta ama xanaanada
    - Dhismaha ama shaqada goobta culus (qandaraasleyaal, rayid culus, degaan)
    - Adeegyada waxbarashada (tababarka, waxbarashada fogaanta)
    - Maaliyadda, caymiska, ama hantida ma guurtada ah (bangiyada, bangiyada maalgashiga, dillaaliinta caymiska, dillaaliinta guryaha)
    - Soo dhaweynta (hoteelada)
    - Cilmiga nolosha ama bayotechnoolajiyadda (cilmi -baarista iyo horumarinta, daawooyinka, aaladaha caafimaadka)
    - Wax soosaarka: wax soosaarka cuntada iyo cabitaanka (soo saarayaasha cuntada, habaynta cuntada badda, Warshada khamriga, Warshada wine-ka, ka shaqaynta khamriga)
    - Warshadaynta: mid kale
    - Soo saarista buugaagtaa warqada ama macluumaad kale (wargeysyada, joornaalada, Soo saarista buugaagta, sameynta filimada)
    - Adeegyada bulshada (adeegyada cuntada hay'adaha, guriyeynta, adeegyada gurmadka, shaqada bulshada)
    - Softiweerka, Mareegaha internetka cloud ee lagu kaydiyo xogta iyo adeegyadeeda, ama isgaarsiinta telefonka (softiweer, kaydinta xogta ee cloud-ka, bixiyeyaasha internetka, bixiyeyaasha isgaarsiinta telefonka)

- Gaadiidka ama bakhaaraynta (xamuulka, tareenka, gudbinta xamuulka, diyaaradaha, bakhaaraynta, gaadiidka dhulka, shaqaalaha gaadiidka)
- Gaadiidka: biyaha ka dhasha (doonyaha, socdaalada biyaha ku salaysan, xamuulka)
- Adeegyada qashinka (maaraynta qashinka)
- Ganacsatada jumlada ah, baayacmushtar jumlo iibiya

8. **Lambarka Aqoonsiga Ganacsiga Midaysan (UBI).** *Aqoonsiga Ganacsiga Midaysan ee shirkaddaadu (UBI) waa lambar sagaal-lambar ah oo shirkaddaada ka diiwaangeliya hay'adaha gobolka oo kuu oggolaanaya inaad ganacsi ka samaysato Washington. Ka hel UBI-gaaga bog-khadka Waaxda Dakhliga*.

9. **Lambarka Shahaadada Canshuurta Shatiga Ganacsiga Seattle.** *Shatiga ganacsiga Seattle oo ansax ah ayaa loo baahan yahay si uu ugu qalmo deeqdan. Lambarada shatigu waa 4 ilaa 6 nambar. Si aad u heshid lambarkaaga shatiga, aad bog-khadka shatiga Seattle iyo maamulka canshuuraha.*

10. **Cinwaanka boostada ee ganacsiga (haddii uu ka duwan yahay meesha sare).** Kani waa ciwaanka aanu kuugu soo diri doono jeega deeqda. *Fadlan ka tag goobahan banaan haddii ciwaanka boostada uu la mid yahay ciwaanka ganacsigaaga aasaasiga ah.*
    - Cinwaanka ( *tusaale, 1234 Main St.)*
    - Cinwaanka 2
    - Magaalada
    - Gobolka
    - Zip Kodhka

11. **Sideed ku maqashay deeqdan?**
    - Websaydhka OED
    - Qoraalka OED
    - Warbaahinta bulshada (Social Media)
    - Rugta ganacsiyada yaryar
    - Ururka Horumarinta Ganacsiga
    - Urur ganacsi
    - Hadalada la isgaarsiiyo
    - Mid kale

Seattle Office of Economic Development

# Qaybta 5: Shahaadada iyo gudbinta codsiga

Waxaan cadeynayaa ama ku dhawaaqayaa ciqaabta been abuurka iyadoo la raacayo sharciyada Gobolka Washington in waxa kor ku xusan ay run yihiin oo sax yihiin. Dhamaan macluumaadka la bixiyay waxay ku xiran yihiin xaqiijinta dhamaan hay'adaha dawlada ee Gobolka ama Federaalka. Tan waxa ku jira oggolaanshaha dib u eegista iyo ansaxinta macluumaadka xaraynta cashuuraha Ganacsiga & Shaqada ee Magaalada Seattle (B&O). Markaad saxiixdo oo aad soo gudbiso codsigan gargaarka ah, waxaad u ogolaanaysaa Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha inuu galo oo dib u eego macluumaadka canshuurta ee uu soo gudbiyey meheradaadu.

Waa inaad caddaysaa ama ku dhaaratAA bayaankan si aad u gudbiso

codsigaaga. Waxaan cadeynayaa in dhammaan macluumaadka lagu

soo gudbiyay codsigan ay run yihiin.

*Soo gudbi Codsiga*